# Jaamacada Nugaal

## Dhisida Xarunta Cusub, 2007




Maktabada Jaamacada Nugaal

## Hordhac

Intii ka dambeysey burburkii ku habsadey Soomaalida 1991, waxa dhumey tacliintii hoose iyo midii sareba dhamaan dalka oo dhan. Si dib loogu soo celiyo waxbarashada luntey waxa u guntadey dhamaan dadka Soomaaliyeed kuwa dibada jooga iyo kuwa gudaha joogaba. Warqadan waxa aanu kaga hadli doonaa dhisida xarunta cusub ee Jaamacada Nugaal ee ku taala magaalada Laascaanood ee gobolka Sool, Soomaaliya. Waxa kale oo aanu ku qaadaa dhigi doonaa: taariikhda jaamacada, marxalada hada ku jirto jaamacada, iyo hindisaha cusub ee lagu dhisi doono xarunta cusub ee jaamacada Nugaal.

# Taariikhda Jaamacada

Markey aheyd 1999, ayaa waxa lagu dhawaaqey hindisaha jaamacada Nugaal, kadib markii Maxamed Askar Galaydh uu u soo bandhigey aqoonyahano u dhashey degaamada Sool, Sanaag iyo Ceyn ee degan gobolka Minnesota.


Aqoonyahanadaas oo aad u soo dhaweeyey hindisaha jaamacada Nugaal, ayaa waxa markiiba lala xiriirey waxgaradka, culumada, hooyooyinka, iyo Garaadada degaanka ku sugnaa markaas, si weyn ayeyna u soo dhaweeyeen fikirka jaamacada, waxeyna ka qaateen shir degdeg ah. Qodabadii shirka ay ku soo saareen waxa ka mid ahaa: In jaamacada laga furo xarunta weyn ee beesha kulmisa ahna magaalada laascaanood, In la siiiyo dhul deeq ah oo laga dhiso jaamacada, In inta la furayo jaamacada loo diyaariyo ardeydii dhigan lahayd iyo In lala shaqeeyo dadkii hindisey jaamacadan lana soo dhaweeyo.


Dhulka Jaamacada

## Marxalada Jaamacada

Jaamacada ayaa hada waxa ay ku sugun tahay mid xoog ku socota howsheedu. Xog ahaan jaamacadu waxa ay hada ku shaqeysaa xarun kiro ah oo ka kooban dhowr fasal, hal maktabad, hal computer lab, iyo dhowr xafiisyo. Ardeyda hada dhigta jaamacada waa todobaatan iyo sideed ardey, waxana laga qaadaa ardeygiiiba bishii lacag gaareysa $20 dollar, waxana dhiga shan macalin oo qaarkood dibada uga yimid, laakiin dhalashadoodu ay tahay Soomaali. Dhaqaalaha jaamacada waxa uu ka soo galaa lacagta laga qaado ardeyda dhigata iyo macaawino uga timaada Soomaalida degan dibada. Jaamacadu waxa ay leedahay gudi, gudidaas oo qaarkood ay yihiin ganacsato, culimo, hooyooyin, caaqilo, garaado, iyo aqoon yahano kala degan dalka dibadiisa iyo gudahiisa.


Qolka Shirarka


Mohamed Askar Galaydh



Wasiirka Waxbarashada Puntland, Madaxweynaha Jaamacada, weftigii Minnesota iyo Ardey

# Hindisaha Cusub

Sanadkan 2006, gudihiisa ayaa waxa booqday jaamacada Nugaal wafti ka tegey gobolkan Minnesota oo isugu jirey Soomaali iyo ajnabi u dhashey Minnesota. Markii ay tageen magaalada Laascaanood waxa si diiran ku soo dhaweeyey qolka shirarka ee hotel Hamdi mas'uuliyiinta jaamacada, ardeyda, macalimiinta, dowlada Puntland, ururada bulshada, iyo Garaad Jaamac. Ujeedada waftigaas oo ku saabsaneyd sedex qodob oo kala ahaa sida tan:

1. *Xog raadin*, waftigu waxey warbixin ka dhegeysteen mas'uuliyiinta gobolka, ururada bulshada, ardeyda, macalimiinta, iyo ganacsatada magaalada. Warbixintaas waxa soo gunaanadey Garaad Jaamac. Garaad Jaamac ayaa qudbadiisii ku celceliyey in la garab istaago Jaamacada Nugaal. Waxaanu ku soo afjarey qudbadii labo qodob oo kala ahaa: Qodabka koowaad, In qolada ajnibiga ah uu siiyey ogolaansho (viso) dhab ah oo markey doonaan ku imaan karaan gobolka Sool, Sanaag iyo Ceyn.

Qodabka labaad oo ahaa, In uu gudoon siinayo weftiga labo faras oo ay kala dhiibeen jaamacada Nugaal iyo hay'ada ugu weyn xaga arimaha bulshada gobolka Sool, Steadfast Voluntary Organization (SVO).

2. *Isku xidh*, waftiga ayaa waxa ay isku xidhayeen jaamacada Nugaal iyo Inver Hills Community College oo ku taala Minnesota. Waxa waftiga la socdey gabadh cadaan ah oo jaamacada Inver Hills u soo dirtey jaamacada Nugaal in ay soo sameyso xiriir walaaltinimo ah (sister college). Gabadhaas oo layaabtey ardeyda dhigata jaamacada iyo magaalada laascaanood sida ay nabad uga jirto marka loo eego meelo ka mid ah magaalooyinka Soomaaliya. Waxa ayna balan qaadey in ay wax ka dhigi doonto Jaamacada Nugaal marka loo dhameeyo xarunta cusub.

3. *Hindisaha cusub*, ee jaamacada Nugaal oo lagu soo bandhigey halkaas. Hindisuhu waxa uu ka koobnaa labo qaybood: qaybta koowaad oo aheyd sidii ardey badan jaamacada u dhigan lahaayeen, ka dib markii waftigan ay darseen in ay jiraan ardey badan oo diyaar u ah inay dhigtaan jaamacada Nugaal, laakiin aan heysan lacag ay ku dhigtaan. Hindasahan cusub ayaa waxa uu soo bandhigay nidaam loogu raadiyo deeq waxbarsho ardeyda. Deeqdaas oo balan qaadkii ugu horeeyey ay balan qaadeen Soomaalida degan gobolka Minnesota, in ay ka bixin doonaan shan iyo labaatan ardey sanadka ugu horeeya jaamacada. Hindisaha labaad oo ahaa in la dhiso xarun cusub oo jaamacadu yeelato. Xaruntaas cusub oo yeelan doonta xarun caalami ah oo u sahli doonta ardeyda dhigata jaamacada in ay toos uga qaataan fasalo dibada iyo laabab ay ardeydu wax ku bartaan. Qorshaha dhisida


Garaad Jaamac iyo Deborah Johnson


Xarunta Jaamacada Banaankeeda

Jaamacada ayaa bilaabmi doona inta ka horeysa June 2007, dhamaana doona June 2008, haddii Allaha awooda leh ogolaado.

# Gabogabo

Waxa aanu rajeyneynaa in aanu ka heli doono kaalmo weyn Soomaalida oo dhan meel kasta ha degenaadaane, naguna garab istaagi doonaan. Sidii aanu u garab istaagney jaamacadaha hada ka dhisan Soomaaliya: East Africa, Camuud, Hargeysa, Burco, Hiiraan, Kismaayo iyo Muqdisho.


Dhulka u Banaan Xarunta Cusub

Prepared by Abdimalik Askar aabdimalik@hotmail.com